# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:39 AM** **Hansard No.22/8** **Kal-fadhiga 22aad**

**Fadhiyadii 16 iyo 17aad** ***14-15/09/2013***

## Dooda Xeerka Ciidanaka Booliska Xeer Lr. 63/2013 akhriska 3aad oo Socotey 2 maalmood kana qeyb-qaateen 15 Mudane

1. **Md. Cabdikariin Aw Cali Shabeel:-** Mudane Gudoomiye, Mudanyaal waan idin Salaamayaa, waxaan jecelahay inaan wax ka idhaahdo Qodobadii aan hore halkan hore uga sheegay oo ah Qodobada Xeerka Ka Dhiman, Horta Booliiska Aduunka sideedaba waxaa looga yaqaan (National front) waxa weeye baseka ugu weyn ee Cadaaladu ka hirgasho, waa shaqo aad iyo aad xasaasi u ah, Gobol ilaa Degmo iyo meel walba taabanaysa shaqada booliisku weeye, sidaa aawaadeed waxaa loo baahanyahay in si ka fiirsi leh aad looga fiirsado.

   Waxaan soo jeedinlahaa dhawr qodob oo aan is leeyahay way ka maqan yihiin xeerkan

   - Qaabka Qoritaanka Ciidanka iyo saraakiisha cusub ee loo xulanayo Ciidanka Booliska waxaa loo magacaabayaa Guddi aan ka yarayn 9 Qof oo isgu dhafan saraakiil sare oo Ciidanka Booliiska ka tirsan iyo xubno ka tirsan Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
   - Xilka iyo nidaamka lagu Magacaabayo Saraakiisha Booliiska iyo aqoonta lagu salaynaayo iyo heerka Waxbarasho, ee lagu qiimeeyo akaademiga ay ka soo baxaan, si looga baxo habqankii sida hada dhacay fadqalaladii faraha badnayd ee dhacdey.
   - Akaadamiyada ay booliisku galayaan qeybohooda kala duwan iyo qaabka lagu qaadanayo, hadii heer jaamacadeed lagu qaadanayo derajada lagu qaadanayaa maxay noqoneysaa? Ma laba xidigle, ma xidigle, Waayo ardeyda ka soo baxa jaamacada waa lagama maarmaan in ciidanka ka qeybqaataan. waa in iyana Xeerka lagu Cadeeyaa.
   - Heerka akaadamiyada ama tababarada in la cayimo, oo dableyda saraakiishu galayaan iyo tababaro ayaa kala jira, Markaa Wakhtiyada ay

galayaan waa in lagu cayimo iyo intey kaga baxayayaan in Xeerka lagu Cayimo waa lagama maarmaan.

2. **Md. Cabdirahman Maxamed Jaamac:-** Salaan Ka dib, Anigu waxaan u arkaa xeerkan in wax badan oo laga badalaa aanay jirin, wuxuu u baahanyahay in yar oo sixida, ha noqoto khaladadaad mabdiciyan ama waxyaabo yar yar oo u baahan in lagu cadeeyo, laakiin xeerkani waa xeer soo maray maraaxil farobadan, Markaa anigu waxaan ku dari lahaa ama wax ka badali lahaa:-

   **Qodobka 13aad** ee Cabadashada ka dhanka ah booliiska, halka **"Komishanka"** waxaan ka dhigi lahaa oo aan odhan lahaa ha lagu badalo **"Guddi"** waxaa kaloo qoran in la asaaso Gudiddaa Cabashooyinka, laakiin waxaa ka dhiman Awoodihii iyo Waajibaadkii Gudidda, markaa waa in Gudidda la qeexo awoodihii iyo waajibaadkiisa, waxaa ku qoran tusaale ahaan "dad aan hubeysnayn inaan lagu ridin xabad nool" Xeerka, Markaa hadii Gudiddii la horkeeno askari ku riday dad aan hubeysnayn xabad nool, markaa Maxay ku xukumayaan, Sidaa darted waxaan soo jeedinayaa in Gudidda waajibaadkooda iyo awoodohooda loo dhameystiraa ee aan Gudiddi uun la magacabaabin.

   **Qodobka 15aad F/4aad** baryahan waxaa soo batey in xildhibaanadii ka cabanayaa Booliiskii iyagoo shaqadoodii ku soo socda, markaa hadii cabashadasi inagu badantahay waxaa soo jeedinayaa in halkan lagu qoro Qodobka 14aad laba farqadood oo kala ah, **A** "ilaalinta Maamuuska iyo dhowrista Xasaanada iyo karaamada shakhsinimo ee Golayaasha Qaranka" waa waajibaadka Booliiska, hase yeeshee hadaan ninkii askariga ahaa loo tababarin oo loo sheegin xasaanadii wuxuu doonuu joojinayaa idina waxaad noqoneysaan laba nin oo is feedhay, **B** " u tababarida askarta iyo saraakiisha ciidanka booliiska ilaalinta maamuuska iyo dhowrsanaanta Xasaanada iyo karaamada Shakhsinimo ee Golayaasha Qaranka".

   Sidaa darted, Saraakiishan derajada lagu taxay waa in la siiyaa tababar in uu ilaaliyo xasaanada Xildhibaanka, si aanaan askarta isku xag-xagan waa in loo sheegaa Ciidanka markaa waa in Qodobkaa lagu daraa Xeerka.

3. **Md.Cabdi Maxamed Jaamac (Gaagaale):-** saddex qodob baan ku darayaa anigu Xeerka oo kala ah:-
   - Qaab dhismeedka Booliiska Somaliland, laba taliye ku-xigeen baa la sameeyay Xeerka, hadaad tagto booliiska waxaad ugu tageysaa taliye

kaliya oo miis cidla ah iska fadhiya, hadii laba ku xigeen loo sameeyona waa laba Wasiir ku-xigeen oo la sameeyay oo kale waxba soo kordhin meyso, Markaa ha loo daayo Taliey Ku-xigeen kaliya, oo kan labaad meesha ha laga saaro.

- **Qodobka 19aad** taliyaha Marka la Magacaabayo aqoontiisa waa in loo eegaa oo lagu daraa inuu Jaamacad ka soo baxay.
- Waxaan kaloo Qodobkaa ku darayaa "Waa in la sameeyaa Ciidan Dab-demis ah" waa ogtihiinoo Ciidan dab-demis ah oo aan leenahay ma jiro Aduunkana Ciidanka booliiska qeyb ka mid ah ayaa ah Deb-demis.

4. **Md: Xaashi Xuseen Caabi:-** Anigu Xeerkan waxaan ka hadli lahaa dhinaca xildhibaanada iyo maamuuskooda bilayska in badan waynu ka qaylinay oo waynu ka hadalnay sideedaa sano ee aynu joogney inaga iyo Bilayska xad ha laynoo kala sameeyo ayaynu lahayn hadana ilaa maanta waxaynu taaganahay bilownay waxaan anigu second garaynayaa inkastoo wasiirku ku balan qaaday maalintii dhoweyd inuu wareegto samaynayo oo uu Bilayska gaadhsiinayo hadana waxaan is leeyahay wareegtadaasi kuma filna hadaynaan inagu gacanteena wax ku samayn taas Wasiirku inuu sameeyeyna ilaa iminka u malaynmaayo laakiin waxaa dhaxal gal noqon karta inaga oo inagu aan Xeerkaa ku qorno.

**Waxaan markaa soo jeedinayaa:-**

- In sidan uu C/raxmaan Xoog iminka uu lahaa in Siminaar wacyi gelin ah oo Golayaashu qiimaha ay ugu fadhiyaan qaran in laga dhaadhiciyo Xeerkana lagu daro qodobo badan oo sheegaya inuu Xildhibaanku leeyahay Xasaanad aynu iska dhaadhicino qaranka waxa aynu ugu fadhino.

5. **Md. C/raxmaan Yuusuf Cartan**:- Xeerkani wuxuu qaranka u leeyahay muhiimad weyn Xeerkan mabaadiida caalamka waxaa ka socda dib u habaynta booliiska (military and police reform) oo macneheedu yahay nooca booliiska aad dooneysaa waa noocma ma mid dadka dhibaya oo wax burburinayaa mise booliis ka duwan weeyaan markaa waxaa jira laba booliis.

waxaa jira booliis (community friendly) ah oo shacabka la shaqeeya oo dadku siday wax u doonayaan ula shaqeeya ayaa jira waxaa jira booliis kasoo jeeda nidaam yadii keli taliska ahaa ee dadkan xayawaanka u haystey oo dadka

tukhan tukhaynaaya oo shaadhka jiidaya xitaa Xildhibaanadii aanay mari karayn bal booliiska Xildhibaanadii ka cabanayaan maxaad u malaynaysaan dadka shicibka ah ee aan title haysana markaa maaha in uun la ilaaliyo Xasaanada xildhibaanada oo qudha e waxaa loo baahanyahay muwaadiniinta Somaliland in si sharaf leh oo ixtiraam leh oo xurmo leh loola dhaqmaa waxaa loo baahanyahay booliis ixtiraama islaan tamaandhada suuqa ku haysata.

Sidaa daraadeed kuma cada halkan nooca Booliiska ee aan u baahanahay ciidankeena saraakiisheena Booliisku makala cada, hadiii layidhaahdo civilian police ayaa la samaynayaa booliis xaafadaha ku xidhan oo dadka u hiilinaaya oo dadweynaha iyo booliisku ay denbiyada ka wada shaqaynayaan saraakiisheena booliisku ma aaminsana qodobkaas waxay aamin sanyihiin booliiskii Maxamed Siyaad Bare ee keligii taliyaha ahaa ee dadka guryaha ugu dhacaayey ee dadka dhibaayey Xeerkanina ma cadaynaayo nooca booliiska ah ee aynu doonayno markaa waa inaan Xeerka ku cadaynaa inuu booliisku yahay mid Bulshada u adeegaya, cida khaladka lehi maaha Guddida maaha adhoc committee ga laakiin dhamaanteen qayb ayaynu ka nahay Xeerarka xun xun ee aynaan ka shaqaynayn ee soo akhriyeyn ee aynu halkan uun marka layimaado lagu dul fekeraayo.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- sidii Siciid Cilmi sheegay Xeerka hala akhriyo oo Xeer dhab ah oo Booliiskeena iyo shicibkeenaba u adeegaya hala soo saaro.

6. **Md. Siciid Warsame Ismaaciil:-** Waxaan odhan lahaa sidaa hada uu sheegayo Xil C/raxmaan Cartan Xeerkan mabaadiidiisa waxbaa ka maqan nooca Booliiska ee aan dooneynaa waa inay cadahay mawaxaynu dooneynaa civilian police mise centralized police, waxaa kale oo ka maqan qaabka hawl galka Ciidanka Booliisku markuu hawl gelayo waa inay cadahay siday u hawl gelayaan, waxaa ku qoran halkan wuxuu qaadanayaa hub marka ay fulinayaan hawlo shaqadooda la xidhiidha, hubka inay wax ka horeeyaan ayaan anigu aamin sanahay oo ay ka horeeyaan “Booliiska caadiga ahi in aanu hub markiiba ka hawl geline ee waa inuu qaataa budhkii hadii la waayo xabadihii rabadhka ahaa waa in wuxuun kale oo qaab kale ahi ka horeeyaan oo hubka aan markiiba lasoo qadimin ayaan anigu aaminsahay.

   waxaan kale oo ku darayaa qodobka kale ee ah magacaabista Taliyaha Ciidanka Booliska, qodobkaasi sidii uu sheegay Xildhibaan Gaagaale waxaan

odhan lahaa halagu daro inuu academy yahay qualification kiisa halagu daro meesha oo hala cadeeyo kuliyada ciidan ee uu kasoo baxay oo police academy halagu daro.

7. **Md. Maxamed Cumar Aadan (Jiir)**:- Qaanuunkan sida loo sheegayba waa Qaanuun wada muhiim ah Nabad-gelyada haday tahay , Bini'aadantinimada haday tahay, ilaalinta qofka iyo sharaftiisa haday tahay waa waxyaabaha ugu muhiimsan ee umadi yeelan karto, Ciidankuna waa ka ugu muhiimsan waana inuu ahaado mid trained ah oo aqoontii leh oo garanaaya waxan uu ku shaqaynaayo waxyaalahaasna waxaan u arkaa inay dhimanyihiin malaa mabaadiida guud hadii lagu daro dadka la qaadanayo in la tababaro malaa taasi dhibaato ma yeelateen.

   waxaan xoojinayaa **Qodobka 3aad F/4aad** ee uu leeyahay tababaro iyo in lasiiyo, markaa tababaradaas waan jeclaystay booliiska in la gaadhsiiyo tababaradaasna sameeyaan.

   **Qodobka 8aad** waxaa ii muuqata oo halkaa ku yaal "Booliiska Somaliland wuxuu leeyahay madaxbanaanidiisa" waa maamul iyo maaliyadeed markaa eraygaa maaliyadeed waxaa ka iman kara Su'aal in layara cadeeyo ayuu u baahanyahay maaliyadeedna waxa macnaheedo noqonayaa isagaa maaliyadiisa samaysanaya ma cada waana wax lagu doodi karaa hadhow waxaan odhan lahaa anigu halkaa "maamul iyo maamulka miisaaniyada loo qorsheeyey" ayaan ku dari lahaa inuu miisaniyada umada kamid yahay ee aanay iyagu maamul miisaaniyadeed gaar u leeyihiin oo ay u madax banaanyihiin.

   **Qodobka 12aad** waxaan isna ku dari lahaa **F/7aad** "Awooda la xidhiidha Dalacaada Ciidanka Booliiska" halkaa waxaan kusii dari lahaa waxaa sababaynayna madaxda booliiska, waa inay sababeeyaan maxaa yeelay hadaan sababo gaara la qorin waxaa imanaya muran, waxaana lala socodsiinayaa Wasiirka arimaha gudaha.

   **Qodobka 13aad** waxaan odhan lahaa hadii ay cabasho timaado waa in wasaarada arimaha Gudaha iyo Wasaarada Cadaalada labadaa loo qoraa oo iyaguna ay noqdaan qaar imtixaaman oo marka dadku ka cabanayaan booliiska iyaga marka hore la ogeysiiyo oo iyagu baadhaan hadii taa ay ka timaado, waxaan odhan lahaa inagu Golayaal ahaan inaynaan shuqul ku yeelan wixii maamul ah ee aan guud ahaan wixii cid dhibaato ku haya aynu

ilaalino iyo inaynu in qawaaniintii inay sideedii u fuleen daba galo waa masuuliyadeena koowaad,

8. **Md. Maxamed Xuseen X. Ciise:-** Shirgudoonka iyo mudanayashaba waan salaamayaa, Gudoomiye in akhris 3aad la galiyo Xeerka waan taageersanaa doodeydii horena waan ku darsadey oo in xeerka aad loo balbalaadhiyo iyo wixii ka dhiman lagu daro waan qabaa, Xeerkan booliiska xildhibaano iga horeeyay oo ka hadlay waan ku waafaqsanahay.

   Laakiin Nooca Booliiska aynu doonaynaa waa noocma, waa inuu Xeerku yahay Mid ka jawaabaya oo lagu cadeeyaa, waa run qeybo ka mida inay ku qoran tahay Ciidanka Booliiska waxaa loo tababarayaa inuu noqdo Ciidan madaniyah, taasi micnaheedu maaha Ciidanka iminka inoo joogaa waa Ciidan madaniyah, Maaha Ciidan Madaniyah, Ciidanka Madaniga ahi waa inuu wataa Budh iyo katiinado madaniya wax kalena ma qaadan karo aana ahayn katiinad iyo Budh.

   Markaa Waxaa Haboon in Mabaadiida Guud ee Xeerka Lagu sheego Nooca Booliiska Madani markaa waxaa haboon in Xeerka lagu sheego in booliisku noqonao Ciidan Booliis Madaniyah ama mid noqonayo labadaba oo madaniya oo hubeynsan buu noqonayaa, Markaa iyado lala kaashanayo khubarada Ciidanka booliiska in la sameeyo Mabaadiidaa Guud ee Ciidanka booliiska.

   Ciidan baa jira aan xeerka ku jirin oo iminkaba jira Ciidanka Awoodaha ciidanka booliiska wuu ka maqanyahay ma jiro ciidam dab-demis ah oo dab-demisku boosiiku ka mid yahay oo hoos tagaa markaa waa in xeerka lagu sii qeexaa, Sidoo kale Ciidanka tulba-taariyada ee Cashuuraha ilaaliya iyana waa Caadiian gaara markaa aqoonta, and Sifadooda waxaas o dhan waa in xeerka lagu cadeeyo oo ay noqdaan Ciidan u tababar shaqadood gaarka ah.

   Waxaa jirta manta inaga ciidamada gaarka ah SSPU ee Ciidamada booliiska ka mida oo tababar oo si medeniyah loo tababarey, Markaa waa Xeerkan ka muuqataa Gudoomiye oo lagu cadeeyaa,,

9. **Md. Maxamed Saalax Cige:-** Shirgudoonka iyo Mudanayaasha waan salaamayaa, anigu dooda xeerkan inteedii badneyd horaan u soo jeediyay, waxaan codsanayaa Erey bixinta in meelo badan laga raaco doodeydii hore, waana la qabaa mudanayaashii ee ka hadlay in sal iyo sees looga dhigo

mabaadiida xeerkan oo lagu qeexo qodobka 4aad ee xeerkan oo aad moodo ilaa iminka ayna ahayn sidii la doonayay ee in booliiska Somaliland loo tababaro loona habeeyo qaab Booliis rayida, taana waxaan soo jeedinayaa in lagu daro, oo qaabkaa la raaco ama qaabka uu u qoran yahay iminka.

**Qodobka 13aad** ee Cabashooyinka ka dhanka ah Ciidanka Booliiksa waxaad moodaa inaanu dhameyn oo tafa-tirnayn oo hadhaw keeni karo muran hor leh, ama qoraalkuun baa meesha ku jiree aanu ahayn wax jiraba, waayo xafiis dabagal iyo cabashooyin aan jirin baa la leeyahay ha loo cawdo, markaa wax dadku u cabanayaan uu noqdaa Xafiis jira oo muuqda, ama cid gaara loo cayimaa oo xeerka lagu sameeyaa, hadana waxaa muuqatada in Gudiddii la magacaabay oo 7 xubnood ku qoran tahay, mar cabashaa la gudbinayaa, marna Cabashaa loo gudbinayaa Gudiddan madax banaan arrinkaasi wuxuu u baahanyahay la helo qaab la isugu xidho oo si fiican loo tafatiro oo bal cabashadu noqoto mid ileyn Ciidanku Maxkamadey leeyihiine loo gudbiyo, oo Xeerka in lagu cadeeyo in qofku si caadiya u dacwoodo, oo askariga si caadiy Maxkamada iyo dacwada u horyimaado iyo in dadkii cabanayay meel gaar ah oo ay u cawdaan ay jirtaa, labadaa arrimood wax ka dhaxeeyaa ma jiraa.

**Cutubka 4aad Qodobka 15aad** ee Waajibaadka Ciidanka doorkii hore waan sheegay, waajibaadkaasi wuxuu ku jiraa oo ay tahay in lala eego Xeerka Ciqaabta Guud oo la is waafajiyo, oo qodobadiisa ugu horeysa ka hadlayaa, waxaa ku cad Xeerkan in Xeer-ilaaliyaha Guud dacwadihii isagu maxkamadaha hortooda uu ka oogi karo, Xeerka Ciqaabtana waxaan filayaa inay si kale ugu taalo qodobo dhowr ahi ka hadlaya, Markaa waxaan soo jeedinayaa in Xeerka Ciqaabta Guud lala eego oo la iswaafajiyo, si aan khilaaf u iman iyo waxay iskood ciidanku u wadaan aanay u dhicin.

**Qodobka 16aad Faqradihiisa 1aad iyo 2aad** iyana waxaa soo jeedinayaa oo lagama maarmaan ah in la raaciyo iaydoo la Xeerka Ciqaata Guud dhigayo oo xaga dambe midkasta laga raaciyo, sidoo kale F**/4aad** ee Ciidanku inay hub adeegsan karaan, waxaan ka saarayaa (ama la ahaato) oo ah aan ahayn erey Sharci waayo wuxuu odhan karaa way ila ahaatey taasina wax Xeer lagu qoro maaha, markaa waa in la xadiddo Xaaladaa. **F/6aad** iyana sidoo kale in lala eego sida uu sheegayo Xeerka Ciqaabta Guud loo raaco, F/7aad waa khalad xaga madbacada ah baa qoran oo waa in inta hore laga saaro ee ah “inaan” weeye.

**Qodobka 20aad** kalmada ku saaybsan da'ada ma jiro Xeer Qeexaya ama Qodob qeexaya markaa inaya waa in la cadeeyo intay noqoneyso ma 70 baa, iyana runtii in la qeexo ayay u baahantahay, **F/5aad** ma cada waa in la cadeeyaa, waaoy waxaa jirta askar badan oo had iyo jeer shaqada laga eryo iyadoo sabab cad oo looga eryey jirin, marka xubinta la eryayo waa inay jirtaa sabab cad oo looga eryay, Markaa waxaan ku daray "hadii shaqada laga eryo isagoo galay dambi cad oo la cadeeyay".

**Qodobka 22aad** waxaa isku jira Derajadii iyo direyskii Ciidanka, Xeerkanina waa Xeerkii Ciidanka booliiska, waxaan soo jeedinnayaa in halkan lagu cadeeyo direyska booliiska oo la yidhaahdo direyska Ciidanka Booliiska si Xeerkan waafaqsan baa loo diyaarinayaa oo Calaamadii lagu tilamaamo.

Dhaartana Dastuurka ha loo eego, waxaad moodaa inay ka badan tahay oo dhaar badan halkan ku qoran tahay.

**Qodobka 30aad** Farqadihiisa marna waa anshax marinta iyo asluubta, marna waa anshax-marin, marna waaa ciqaab, markaa waa in lakala saaro labadaa, waayo ciqaabta Xeer baa qeexaya, waxaa ka mida f/3aad oo sheegaysa haday kala horyimadaan Hub, Markaa waa in laga saaro dhamaan Farqadaha waayo waxaad moodaa inaanay is waafaqeyn Dambiga uu galay iyo anshax marintii ama amar diidadii uu sameeyay ama shaqadii uu ka habsaamay, oo waa inaanay faldambiyeedka iyo anshax marintu iskaga keen khaldamin.

**Qodobka 32aad F/1aad** ma dhameystirna, oo waxaa ka maqan waxyaabaha la sheegayo haduu ku sifoobo **F/2aad** iyana Ma dhameystirna, isna farqadaa hore ee aan dhameystirnayn bay tilmaamaysaa, waxaad Moodaa Qodobka inaanu cadeyn oo wax dhameystiran ahayn, sidoo kale Xeer Ciqaabeedkii loo raaci lahaa ayaa ka maqan, markaa dib qodobkaa ha loogu wada noqdo.

**Qodobka 36aad** ee Hubka iyo Rasaastu ku qoran tahay isna wabaa baa ka maqan, Markaa waxaan ku daray halka dambe "ama Geeriyoota", intaas ayaan ka gaadhsiiyay oo aan eegay. Waad mahadsantihiin.

10. **Md Ibraahin Ahmed Raygal:-** Gudoomiye dhawr Qodob baan jeclahay inaan ku daro Qodobada ay ka midka yihiin masalan sifooyinka lagu qaadanayo qofka Poliska ah waa inuu noqdaa Somalilander, waxaan ku biirin lahaa in lagu daro inuu Caafimaadqabo ama ay caafimaad qabto, in dhererkiisu yahay ama ay tahay 1.8 mitir (hal mitir baynti aydh) oo qof ka yar aan loo qaadan karin Polis.

Waxaan ku dari lahaa qofka askariga loo qaadanayo in lagu qaato aqoon isla markaana ay qayb ka noqoto jahaynta dhalinyarada oo la yidhaahdo waa inuu ka baxaa Dugsi dhexe.

Qodobka kale ee aan ku darayaa waa in aanu lahayn ama aanay lahayn balwad qofka loo qaadanayo askariga oo aanu qofkaasi isticmaalin maandooriyeyaasha sida qaadka, xashiishada iyo wixii lamida waxa kale oo aan soo jeedinayaa askarta marka laqaadanayo in loo sameeyo baahin lagana qaato degmooyinka waa sidii caadadu ahaan jirtay marka askar laqaadanayo isla markaana si degmo waliba uga qayb gasho ay tagaan saraakiisha soo xulaysaa dalka oo dhan si halkaa looga soo xusho isla markaana mudo 7 cisho ah uu degaanku ka war qabo in askar laga qoranayo degmadaa iyada ah.

*Xaga derejada* waxaan ku dari lahaa marka askarigu shaqaynayo mudo 2 sano ah inuu qaato alifka ugu horeeya oo lagu siiyo shaqo wanaag in uu qofku shaqo wanaagsan yahay, xadhigle ama gocondho waxa lagu qaadan karaa markuu qofku dugsi sare yahay ee uu ka soo baxo dugsiga isla markaana uu soo dhamaysto tababarka ciidanka, xidigle waxaan soo jeedinayaa markuu qofku ka soo baxo kuliyada ciidanka ee soo dhamaysto 2 sano in la siiyo.

*Xaga Masuuliyada* kale ee uu qabanayo waxaa soo jeedinayaa taliyaha ciidanku polisku inuu noqdo sareeye guud qayb ka loo dhiibayo taliyaha poliska waa inay intaa u raacdo sareeye guud isla markaana Jaamacad ka baxay shaqaynayeyna mudo 25 sano oo uu ku jiray ciidanka.

*Xaga Qaybaha poliska* qayb ka mida marka loo dhiibayo inuu mudo 20 sano ah shaqada hayey iyo inuu yahay xaga derejada sareeye gaas, gobol marka loo dhiibayo waa inuu mudo 20 sanadooda shaqada poliska hayey isla markaana uu yahay gaashaanle sare.

Rugta Poliska amase degmo marka loo dhiibayo waxaan soo jeedinayaa inuu yahay xaga derejada Gaashaanle dhexe da,diisuna aanay ka yarayn 45 jir.

*Xaga Ruqsadda qofka poliska* ah waxyaabaha lagu ruqsayn karo inay ka mid tahay

1. Laaluush qaadasho in uu laaluush qaato
2. Hadduu qabyaalad ku dhaqmo
3. Hadduu la dagaalamo taliyihiisa ama askari kale
4. Hadduu ku kaco budhcadnimo oo lagu soo cadeeyo.
5. Haddii uu shaqada soo xaadiri waayo mudo 30 beriya sabab la,aan

11. **Md. Xariir Sicid Bulaale:-** Waxaa weeyaan guddi kamid ah Golaha Wakiilada iyo Khubaro Ciidanka sida Ina Cumar Kujoog oo kale waa in loo gubiyaa Xeerka dabadeedna Xeer tafatiran oo umada anfacaya in Goleheena uu ka baxo ayaa muhiim ah.

12. **Md. Siciid Cilmi Rooble:-** Inaga waxaa laynaga rabaa Xeer la jaan qaada dabeecadeena maanta iyo sida aynu u noolahay maanta anigu markaa waxaan leeyahay meel wanaagsan buu Xeerkani marayaa waxaan ku darayaa Guddoomiye Qodobka 13aad ee Guddida Cadaalada ku taalo, halkaa guddida Cadaalada maaha ee waa komishanka xuquuqul iinsaanka aadamaha waxaan ka hadlayaa cabashada ka dhanka ah Ciidanka Booliiska guddidii aynu samaynay ee wixii booliisku dhibaato geysto loo tegaayey faqrada (E) halka guddida cadaalada lagu qoray waa Komishanka xuquuqul iinsaanka Aadamaha taas waad ka bedeleysaan

    Ta labaad waxaa weeyaan halkan waxaa shalay Xildhibaanadu ka sheegeen in awooda Komishanka Cashooyinka ka dhanka ah Ciidanka Booliiska iyo daadejintiisa ilaa heer gobol anagu hadaanu nahay guddidii Xeerka kasoo shaqaysay waanu soo samaynay waxaanuna sheegnay awooda Gudida cabashooyinka ka dhanka ah ciidanka Booliiska laakiin waa laga reebay sababtoo ah doodii ayaanay ku jirin maanta doodii waynu ku daraynaa waanan soo jeedinayaa.

    **Awooda Guddida Cabashooyinka Ka dhanka ah Ciidanka Booliiska**

    1. Inay soo baadhaan markay helaan cabasho ka dhan ah Xubnaha/xubin kamid ah Ciidanka Booliiska waxaanay qaadayaan talaabooyinkan
       a. Way dhegeysanayaan dacwadahooda
    2. waxaanay u xil saraanyihiin denbiyada ka dhanka ah xuquuqda aasaasiga ah ee Bili'aadan nimo ee ku xusan xubinta 3aad ee Dastoorka
    3. Xil gudashada gudidaas waxaa waajib koodu yahay inay dacwadahooda loosoo gudbinaayo ama ay talaabo ka qaadayaan ay ku salaysnaadaan Xuquuqda Aasaasiga ah ee Bili'aadan nimada ee ku xusan xubinta 3aad ee dastuurka.
    4. Muddada Xilkoodu waa sadex sanood waxay samaysan karaan Xeer nidaamiye u gaara oo hawshooda qeexaaya
    5. waxay awood u leeyihiin inay ka gar naqaan kana soo saaraan Go'aan, Go'aankaas waxaa loo gudbinayaa Xeer ilaalinta Guud si ay ugu soo oogto Dacwad xubintii Booliiska ahayd ee fal denbiyeedka gashay.

Waxaanu kale oo daadejinay ilaa heer Gobol 3 xubnood baanu nidhi haka koobnaado xubini waa Golaha Deegaanka oo uu soo magacaabo duqa magaaladu, xubin ka tirsan culimada Deegaanka waxaa iyadana soo magacaabaya Mayerka iyo xubin sarkaal Booliis ah oo uu soo magacaabaayo badhasaabka Gobolku iyadana waxaa dacwada loo gudbinayaa Xeer Ilaalinta Gobolka.

**Qodobka 19aad** ee magacaabista waxaad Xeerka moodaa meelo ayaa laga tegey markaa wuxuu u baahanyahay in dib loo akhriyo.

Waxaa mudane Guddoomiye jirey cutub laga saaray Xeerkan oo ka **hadlaayey Dalacaada iyo Abaal marinta Xubnaha Ciidanka Booliiska**, waxaan jeclaan lahaa cutubkaasi waa mid aad u muhiim ah waxay ka hadlaysaa yaa u qalma dalacaada, yaa u qalma dalacaada markaa waxan odhan lahaa waa procure dhan oo khubaradaa hore sameeyeen markaa Cutubkaa sidaa aan ku qaadano.

Majiraan sifo sharci ah oo ay isugu xidhanyihiin Ciidanka Booliiska, Badhasaabada iyo Mayeradu waxaad moodaa isku xidhnaantii Dawladnimo iyo maamul daadejintii inay meesha ka maqantahay, waxaan markaa odhan lahaa sida Xeer-23 aynu beri hore ku qornay aynu Xeerka Booliiska laftigiisa ku qorno waxaanan odhan lahaa Gudoomiyayaasha Goboladu waxay ka masuul yihiin nabad-gelyada Goboladaas ay madaxda ka yihiin, taliye qaybeedyada Ciidanka Booliiskuna waxay ka amar qaadanayaan Guddoomiyayaasha gobolada iyagoo taliyahoodii ku xidhan, guddoomiyayaasha Degmooyinku waxay ka masuul yihiin nabad gelyada Degmooyinka ay madaxda ka yihiin, taliyayaasha saldhigyada dhexe waxay ka amar qaadanayaan Guddoomiyayaasha Degmooyinka.

fikradihii uu shalay soo jeediyey Maxamed Saalax aadbaan u taageersanahay , **Qodobka 20aad f/ 2aad** haday gaadho da'da hawl gabka halkaa Xeer hawl gab maynaan samayn ama aynu ku darno da'da hawlgabka ilaa 75 sano, waxaa jira Ciidan layidhaahdo RRU, mid layidhaahdo SPU markaa waa in sharci qabta loo sameeyo kuwaas ama waa in la tirtiraa oo la dhehaa waxba kama jiraan markaa Ciidankaas waanu soo qaadanay waxaanuna Cutubkaas u bixinay **Abuurista, Waajibaadka iyo Hawl galka Ciidamada gaarka ah ee Booliiska.**

**Point of Correction C/kariin Aw Cali Shabeel:-** Anigu waxan qabaa Booliiska magacyo kasta oo loo kala sameeyo in aan lakala qaadi Karin oo aan laan

Booliiska ka tirsan sharcigu gooni ula bixi Karin laakiin Xeerkan uun ka dhaxeeyo oo sharciga Booliiska isku meel uun lagu dabakho oo aan lakala saar saarin Booliiska.

13. **Md. C/qaadir Jaamac Xaamud:-** Xeerkan in badan baa laga dooday fekrado badana waa lagusoo kordhiyey waxaan soo jeedinayaa in qaabka loo qoro Ciidanka Booliiska wax laga bedelo waa in gudi habaysan loo saaraa oo soo qiimaysa Qaabka loo qoro Ciidanka Booliiska.

    **Qodobka 10aad** Xuduudaha , Booliiska Somaliland wuxuu ka hawl gelayaa dhamaan Xuduudaha JSL iyo goobkasta oo uu u ogolyahay sharciga Somaliland ama sharciga caalamiga ahi u ogolyahay inay ka hawl galaan runtii waa muhiim in markaa waa muhiim in xuduudaha Somaliland oo dhan uu ka hawl galo Booliisku, waa in Booliiska la fahamsiiyaa qawaaniinta, waxaan kale oo ka hadli lahaa cabashada ka dhanka ah ciidanka Booliiska runtii guddidaa way madax banaantahay laakiin waa in ay awood leedahay ay wax ku qaban karto,

14. **Md. Cali X. Maxamed Muuse:-** Xeerkan Gudid baa loo xilsaarey oo ka soot ala-bixisey, waxaan jeclahay inaan qaabka Booliiska qaranka Somaliland sheego, booliisku waa qayb ka mida ciidamada qaranka ee u xilsaaran difaaca dalka ee gudaha iyo dibada intaasi waa waajibaadkood.

    Waxaan u dhaafayaa ilaa maalinta la soo qoro booliiska ilaa uu kuliyada booliiska ka galayo qaabka uu ula dhaqmayo booliiska gudihiisa, horta barigii hore miyiga ayaa laga soo qori-jirey askarta, laakiin intii dambe iskuulada laga qoraa, waxaan jeclahay marka askarta laga soo qoro iskuulada iyo marka miyiga laga soo qoro wey kala duwanaanayaan, waxaa loo baahanyahay in mid kasta qaab gaara loo tababaro, iskuulo ayaa jira kala duwan.

    waxaa ka mida iskuulada qeyb la yidhaahdo arkaan ee kuliyada tacliinta sare, makaa hadii marka uu dhibooga la soo qoro sida ciidamada qaramada ayuu u hawlgalayaa hadii aanu ka soo bixin iskuulada.

    Iskuulka booliisku wuu ka duwanyahay kan militeryga, kan militergu marka uu iskuulka sare ka soo baxo ayuu ku biirikaraa, laakiin booliiska waxaa loo baahanyahay inuu imtixaanka ka soo gudbo oo shahaado secondary la yimaado, haduu alifle yahay ilaa saddex alifyahay, inuu shahaado sito si uu iskuulka booliiska u galo.

    - Dable ilaa alifle waa askari,

- 2 aflifle, 3 alifle, gocondhaale waa sarkaal xigeen.
- Xidigle, 2 xidigle iyo dhame waa sarkaal hoose.
- Gaashaanle, gaanshaale dhexe, gaashaanle sare waa Sarkaal sare.
- Sareeyo Guuto, Sareeye Gaas, Sareeye Guud, Marshal iyo admiral waa generals, sidaasaey u kala sareeyaan, iskuuladuna sidaasay u kala qeybsanaanayaan.

Haduu markaa askarigu uu shahaado iskuul sare qaato, iskuuladaas ayuu galayaa, dabadeedna markuu ka soo baxo xidigle noqonayaa, hadii uu dalaco kan xiguu galayaa, haduu sii dalacona kan ku sii xiguu galayaa.

Intii dambe iskuulo laga soobaxay may jirn, saraakiisha yar yar derajooyinka qaatey baa soo baxaya, Ciidankii hore ee waaweynaadayna Xeerkii pensionka ha loo sameeyo oo la sababeeyo da'da uu ku pensiongaroobayo, Ciidankii miyigana laga soo qaadan jireyna laga maarmo oo ardeydaa iskuulada ka soo baxdey ciidankii noqdaan oo derajada loo qeybiyay.

**Markaa anigu waxaan leeyahay:-**

- Ha lagu daro qorshohooda tacliintii booliiska, Iskuuladoodii, Derajdoodii iyo sidey u dhaqmayaan waxyaabaha lagu qiimeynayo.

15. **Md. Aadan X. Diiriye dirir:-** Marka hore waan idin salaamayaa, hadaan ka hadlo Xeerkan waxaan taageerayaa Soo jeedintii Cali X. Maxamed, sidoo kale waxaan dhinaca ka taageersanahay Soo jeedinta Siciid Cilmi Rooble, Meelaha aan isleeyahay xeerku wuu u baahanyahay waxaa jira Muwaadin kasta oo Somalilander ah waxaa jira wax waajib ku ah iyo wax ka reeban, ninka muwaadinka waxaa waajib ku ah inuu booliisku la hawlgalo ee hawlgudanaya wuxuu geysto saacada uu gudanayo ama wixii ka yimaada inay xeerka Ku cadaato waa muhiim oo qofkaasi yaanu noqon mid ka hawlgalay Cidla.

Qodobada aan isleeyahay Xilgudashada ninka booliiska ee Baadhis iyo qabasho oo ay tahay in Xeerka si Cad loogu qeexo xilgudasha ninka Booliiska.

**Qodobka 1aad** ee Erey bixinta "Mudanaan" waxaa loola jeeda kala sareynta Xubnaha Booliiska Somaliland "Seniority", Markaa macnaha ereyga Mudnaan ma kala sareynta, Mise sida ereyga ingriiska ah ka muuqda ee "seniority" oo ah af Somali ahaan kala sareyn weeye? Waxaan odhan lahaa ha laga dhigo "Mudanaan waxaa loola jeeda kala sareynta Xubnaha Booliiska Somaliland

“seniority’, Ereyga “u-qallan” maxaa loola jeedaa? Ma waxa loola jeedaa u-qallma.

**Qodobka 4aad** ee cidda lagu dhaqayo Xeerka, waxaan leeyahay Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa Booliiska Somaliland, markaa uma baahna in kan jooga iminka ee booliis ah iyo kan soo socda lagu qoro, Markaa waa in laga saaro inta dambe Qodobkan.

**Qodobka 6aad F/2aad** wqaxaa ku qoran “Hirgelinta Dastuurka iyo shuruucda Jamhuuriyadda Somaliland” Markaa Ciidanka Booliisku Ma fulinbaa? Mise waa ilaaliyaan, Markaa waxaan soo jeedinayaa in laga badalo Hirgalinta oo laga dhigo “Ilaalinta Dastuurka iyo Shuruucda Jamhuuriyada Somaliland”

**Qodobka 9aad F/2aad** waxaa ku qoran “Astaanta Ciidanka Booliisku waxay gaar u tahay Ciidanka Booliiska Somaliland oo keliya” waxaana la raaciyay waana lama taabtaan, Makraa Xeerka Marka la qorayo ku noqnoqodka waa in laga daayo, oo Farqada waxay sax ku tahay inta hore, waa in halaga Saaro “waana Lama taabtaan’

**Qodobka 12aad F/2aad** waxaa ku taal farqadaa “ iyo Cida ay khuseyso” af sharci maaha oo Xeer laguma qoro, *Markaa waa in laga saaro intaa dambe ee ah* ***“Cida ay khuseyso”.***

**Qodobka 13aad** ee Gudidda Cabashooyinka ma faah-faahsana sida **Qodobka 14aad uu u faah-faahsanyahay, F/6aad** waxaa ku qoran “Labada xubnood ee Qareenada waxa so magacaabaya Ururka Qareenada JSL” ururada Qareenadu way badan yihiin oo ilaa 3 urur Qareen ayaan garanayaa oo jira, hadii la doonayo qof sharci yaqaan, Xubin Golaha Barlamaanka ama Booliiska ka socota ha laga dhigo, tan kale qofka sharci yaqaanka ee qareenada ka socdaa lacag buu doonayaa, Xeerkana kuama cada lacagta uu doonayo ee uu ku shaqeynayo, Xeer maxkamda lala tagayona maaha, markaa Xubnaha Golayaashu soo magacaabayaan sharci yaqaan ha laga dhigo.

**Qodobka 15aad F/4aad** halka ay ku qoran tahay “iyo Xeerarka kale ee dalka” halkaa waxbaa ka maqan aan ku darno oo ha la saxo, isla **Qodobka 15aad F/15aad** waxaa ku qoran iyo Hay’addaha Caalamiga ah, Farqadaha 22 iyo 23aad oo ka hadlaya ka hadlaya waajibaadka Taliyaha Ciidanka Booliiska, Markaa waxaan raaciyay labadaa farqadood Qodobka 19aad oo ka hadlaya

Shaqada Taliyaha Ciidanka Booliiska ama Qodobka 16aad ee Awoodaha Ciidanka Booliiska, Markaa waa in lagu daryaa midkooda.

**Qodobka 16aad F/7aad** wuxuu u baahanyahay sixitaan ma cada, waa in laga saaro kalmada hore ee ah **"inaan"**, isla qodobkan F/9aad waa in si cad loo qoraa oo la yidhaahdaa qofkii dhaawac soo gaadhoba, waayo hadii qofkii la qabanayay dhaawac soo gaadho so in la badbaadiyo maaha.

**Qodobka 19aad F/4aad (d)** halka ugu dambeysa ee ah "wuxuu awood u leeyahay" waxaa kaga haboon ***"wuxuu Masuul ka yahay"***

**Qodobka 24aad F/6aad** waxaa ku taala " wuxuu muteysan kara Guno" Markaa waxaa kaga haboon "wuxuu muteysan karaa Abaalmarin" waayo gunada wuxuu ku qaadan karayay waa la soo sheegay oo farqadaha hore ayaa lagu sheegay.

**Qodobka 34aad F/2aad** ee ma hanta ma guurto ah uun baa? Labada waxaa muhiima hantida guurtida ah ee rasaasta iyo qoryuhu ka midyihiin, Markaa waxaa soo jeedinayaa in laga dhigo ***"Dhamaan hantida ma guurtada ah iyo guutada ah ee Ciidanka Booliiska waa la diiwaangalinayaa"*** oo labadaba la diinwaangaliyo, intaas ayaan ku soo koobayaa, waana mahadsantihiin.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ------------------------------------------------ | ------------------------------------------ |